

AALADA HUBINTA U QALMIDA

Miyaan u qalmaa gunnooyinka caadiga ah ee shaqo la'aanta?

HAA

MAYA

1. Ma shaqaysay ugu yaraan 680 saacadood "sanadkaaga shaqada?"
Sanadkaaga shaqada ayaa ah afar rubuc ee ugu horeeya shanta rubuc sanad ee aad dhamaysatay kahor asbuuca aad codsiga dirsanaayso Gunnooyinka.
2. Ma ka shaqaysay gobalka Washington xili kamid ah 18 kii bilood ee lasoo dhaafay?
3. Ma awoodaa inaad shaqayso?
Awoodista shaqada waxaa laga wadaa inaad dhimir ahaan iyo jir ahaanba awoodo inaad shaqayso.
4. Diyaar ma u tahay inaad shaqayso?
U diyaarsanaanta shaqada waxaa laga wadaa inaad awoodo inaad shaqayso ayadoo aysan jirin caqabado kaa hor istaagaaya inaad aqbasho shaqo (tusaale ahaan: arimo dhanka gaadiidka ah, xanuun, fasax, ama inaad haysan qof daryeela qoyskaaga/carruurtaada).
5. Shaqada ma lagaa cayriyay?
[Xog badan ka ogoow arimaha la xariiro shaqo ka cayrinta.](#)
6. Ma ka tagtay shaqadaada?
[Xog badan ka ogoow ka tagista shaqada.](#)
7. Ma lagaa saaray ciidanka militariga 18 bilood ee ugu danbeeyay?
[Xog badan ka ogoow.](#)
8. Ma jiro wax kamid ah hadaladaan oo i quseeya anigga. Haddii aan midna ku qusayn, dooro Haa.
 - Shaqada waa layga cayrshay aniga ayaana khaladka lahaa.
[Xog badan ka ogoow shaqada oo lagaaga cayrsho khalad aad gashay awgiis.](#)
 - Waxaan shaqo joojin ku sameeyay shaqadii aan u hayay cidda aan u shaqeeyo.
 - Waxaan uga maqanahay fasax ama maqnaansho shaqadayda.
 - Wali waan shaqeeyaa.

Haddii aad uga jawaabtay **Haa** su'aalahaan **BADANKOOD** ee soo socda: Waxay u badan tahay inaad u qalmi doonto gunnooyinka caadiga ah ee shaqo la'aanta. Sida ugu dhakhsaha badan ee macquulka ah u codso gunnooyinka kadibna waxaan akhrin doonaa codsigaaga waxaana go'aamin doonaa inaad u qalanto iyo inkale. **Si aad uga fogaato khaladaadka aadna degdeg ugu hesho qarashka, fadlan xaqiiji inaad soo dagsato liiska hubinta codsiga aadna akhrido xogta ku qoran barta esd.wa.gov/unemployment kahor intaadan codsan.**

Haddii aad uga jawaabtay **Maya** su'aalahaan **BADANKOOD**: Waxaa suuragal ah inaad u qalmin gunnooyinka caadiga ah laakiin waxaad u qalmi kartaa gunnooyinka la kordhiyay ee lagu baxsho Sharciga CARES ee federaalka inta lagu jiro aafada COVID-19. Dhammee liiska hubinta ee ku qoran bogga kan xigga si aad u aragto inaad u qalmi karto.

LA CUSBOONAYSIIYAY: 04.21.20

ESD.WA.GOV

AALADA HUBINTA U QALMIDA

Miyaan u qalmaa gunnooyinka dheeraadka ah ee shaqo la'aanta ee la xariira aafada COVID-19?

HAA

MAYA

1. Ma ka baxday shaqada ama ma shaqaysaa muddo kayar intaad horay u shaqayn jirtay cudurka COVID-19 awgiis?
2. Dhawaan ma laguu diiday gunnooyinka shaqo la'aanta sabab la xariirta inaad shaqayn 680 saacadood?
3. Ma shaqaysay, laakiin aad ka shaqaysay wax kayar 680 saacadood Washington intii lagu jiray 18 kii bilood ee lasoo dhaafay?
4. Ma lagaa helay COVID-19, aad ma u jiran tahay mana awoodid inaad shaqayso?
5. Ma muujinaysaa astaamaha COVID-19 mana tahay laba midkood inaad sugayso natiijoyinka baaritaanka ama qof doonaaya daryeel caafimaad?
6. Khatar wayn ma ugu jirtaa cudurka MANA kuu sheegay dhakhtarku inaad guriga joogto?
7. Ma daryeelaysaa qof qoyskaaga ah ama ilmo yar oo qaba COVID-19?
8. Ma kuu joogaa qof ehel ah ama ilmo yar oo leh astaamaha COVID-19 oo u baahan daryeel caafimaad?
9. Ma kuu joogaa qof ehel ah ama ilmo yar oo khatar wayn ugu jira cudurka, kula nool adigga oo aad guriga u joogto si aad u difaacdo?
10. Ma daryeelaysaa qof khatar wayn cudurka ugu jira oo lagula taliyay inuu guriga joogo si caafimaadkiisa loo difaaco?
11. Ma la xiray dugsiga cunugaaga mana awoodi wayday inaad hesho cid daryeel siisa cunugaaga?
12. Ma la xiray goobtaada shaqada sabab la xariirta aafada COVID-19, mana awoodi wayday inaad shaqayso adoo guriga jooga?
13. Ma tahay qof ganacsi u gaar ah leh?
14. Ma jiro wax kamid ah qoraaladan oo i quseeya anigga. *Haddii aan midna ku qusayn, dooro Haa.*
 - Waxaan uga tagay shaqadayda sabab aan la xariirin COVID-19.
 - Waxaan shaqadayda uga tagay kaliya inaan helo gunnooyinka shaqo la'aanta.
 - Waxaan hadda haystaa fasaxa dalkiiska, fasaxa xanuunka ama waqtiga fasaxa mushaarka lagu qaato.
 - Waan shaqayn karaa anoo guriga jooga laakiin ma doonaayo inaan shaqeeyo.
 - Waxaan ahay shaqaale muhiim ah, kuma jiro khatar dheeraad ah [goobtayda shaqaduna waxay buuxisay shuruudaha badqabkayga](#), laakiin aad ayaan uga cabsanayaa inaan shaqeeyo.

Haddii aad uga jawaabtay **Haa** MID KAMID AH su'aalaha u dhaxaysa 1-13 IYO su'aasha 14, waxay u badan tahay inaad u qalanto gunnooyinka shaqo la'aanta inta lagu jiro aafada COVID-19. Haddii aad uga jawaabtay **Maya** DHAMMAAN su'aalahaan, waxaa laga yaabaa inaad u qalmin gunnooyinka. Haddii aad aaminsan tahay inaad u qalnto gunnooyinka la balaarshay, fadlan booqo esd.wa.gov si aad u hesho xog dheeraad ah, u diyaar garoowdo aadna u codsato.

LA CUSBOONAYSIIYAY: 04.22.20